

# ADEEGA CAAWIMADA MARKHAANTIGA

Waan ku caawimi karnaa



OFFICE of  
PUBLIC PROSECUTIONS  
VICTORIA

# ADEEGA CAAWIMADA MARKHAANTIGA

## WAXA AANU NAHAY

- Witness Assistance Service waxa uu qayb ka yahay Office of Public Prosecutions (OPP). OPP wuxuu soo oogaa dembiyada aadka u waaweyn ee ka dhaca Fiktooriya
- Waxaanu caawinaa dhibanayaasha iyo markhaantiga inta dacwadu socoto
- Waxaanu nahay adeeg takhasus ah oo ay ka shaqeeyaan shaqaale leh tayo aqooneed kuwaas oo fahmaha cadaalada la xiriiirta dembigu u shaqayso
- Ma nihin Markhaanti Ilaaliyayaal laakiin waxaan kaa caawimi doonaa qabanqaabada bixinta caddaynta waxaana wax laga qabtaa welwel kasta oo aad ka qabto amaankaaga markaad imanayso maxkamada.

## WAXAANU SAMAYNO

- Waxaanu siinaa macluumaad iyo kaalmo dhibanayaasha iyo markhaantiyada dembiyada waaweyn
- Waxaanu qayb ka nahay kooxda dembi soo oogista – booliiska, garyaqaanka OPP iyo Dembi soo-oogaha Dawlada (kaas oo maxkamada u soo qadima dacwada)
- Waxaanu mudnaanta caawimada siinaa qoysaska ay ka dhinteen kuwii ay jeclaayeen, dhibanayaasha iyo markhaantiyada faraxumaynta iyo arrimaha rabshada qoyska iyo dhibanayaasha nugal
- Ma woodno in aan kala hadalo caddayntaada, ama mid ka mid ah caddaynta, adiga laakiin waanu kaa caawimaynaa habka bixinta caddaynta.

## ADEEGA AANU BIXINO

### **Waxaan ku siin karnaa macluumaadka ku saabsan:**

- Habka maxkamadu u socoto
- Xuquuqdaada iyo waxaad mudan tahay wixii khuseeya habka maxkamadu u soconayso
- Xaallada siday tahay iyo taariikhda dhegaysiga maxkamada
- Doorarkaaga, haddii aad bixinayso caddayn, iyo waxaad filayso inta lagu jiro dacwada
- Buuxinta Qoraalka Saamaynta Dhibanaha
- Victims of Crime Assistance Tribunal, Victims' Register iyo u gudbinta qoraal Adult Parole Board.

### **Waxaanu awoodnaa:**

- Inaan bixino kaalmo iyo caawimo markaad u baahan tahay
- In aan kula kulano ka hor intaan maxkamadu bilaaban kuna caawino waqtigaan khaasatan haddii aad welwelsan tahay
- In aan kugu soo wareejino maxkamada halkaas oo lagu dhegaysan doono dacwada iyo doorarka kala duwan ee shaqaalaha maxkamada
- Waxaanu ka jawaabnaa su'aallaha laga yaabo inaad hayso wixii ku saabsan habka maxkamadu u shaqayso
- Ka hadal dareen kasta oo aad qabto wixii la xiriira amaanka intaad joogto maxkamada ama aad caddaynta bixinayso
- In dhegaysiga maxkamada ka dib lagu arko si nasteexa ah
- In la abaabulo in garyaqaanka OPP ku siiyo mutarjum
- In lagu xawilo hay'adaha kaleeto si aad u hesho kaalmo siyaada ah.

## MACLUUMAADKA CIDDA LALA XIRIIRAYO

T (03) 9603 7425

T 1800 641 927 kuwa magaalada  
dibadeeda ka soo wacaya keliya

E was@opp.vic.gov.au

[www.opp.vic.gov.au](http://www.opp.vic.gov.au)

